



WADA LOO WEYSO QAATO YO HABKA LOO TUKADO



**WAXAA AF-CARABI UNAQTIMAY CAALIMKII WEYNAA
SHEEKH C/LAAHI BIN C/RAXMAAN AL-JIBRIIN
ALLEHA XIFDIYO**

**WAXAA AF-SOOMAALI UBADALAY
C/QAADIR SH.MAX,ED AKHII**

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

HORDHAC

إن الحمد لله نحمده ونستعينه ونستغفره، ونعوذ بالله من شرور أنفسنا، ومن سيئات أعمالنا، من يهده الله فلا مضل له ومن يضلل فلا هادي له ، وأشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، وأشهد أن محمدا عبده ورسوله . أما بعد


Walaalkayga muslimka ah iyo walaashayda muslimadda ah ugu horeyntii iga gudooma salaanta ka dhaxaysa muslimiinta meel ay joogaanba:

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته

Walaalayaal salaam kadib Waxaan aad ugu farax sanahay inaan u hadiyeeyo Kitaabkan yar ee macnihiisa Af-soomaaliga loo badalay walaal kasta oo soomaaliyeed, oo jecel inuu Diintiisa barto. waxaana ku dadaali hadii Rabi idmo inuu noqdo kitaabku mid macnahiisa la fahmi karo .Walaalayaal in qofku salaada tukado waxay ka mid tahay nicmooyinka ILLAAHAY ee waa weyn, Ma la socotaan inay jiraan dad malyan dheer ah oon hadana Rabi u sahlin inay tukadaan? Meeqaase maanta dhimatay iyagoon Rabi waligood u sujuudin? Aniga iyo adigase yaa inoo balan qaadaya inaan sii noolaan doono? taasi waxay inagu dhiiro galineysaa inaan ilaalino salaada iyo wixii ku tacaluqa sida weyso qaadka 1.w.m. intaas waxaa dheer oon u dar daarmayaa walaal kasta oo soomaaliyeed oo nasiib u helay barashada Diinta islaamka inuusan dib u dhiganin shey kheyir ah oo ummadu u baahan tahay .

QORE:C/QAADIR AKHII

UGU HOREYNTII SIDA LOO WEYSO QAATO



Qofka muslimka ah markuu rabo inuu weyso qaato waxaa looga baahan yahay inuu weyso qaadkiisa ka niyoodo qalbigiisa, Kadibna dhaho Bis millaah ((بِسْمِ اللَّهِ))

((isagoo raacaya hadalkuu yiri

Nabigu ﷺ : (Weyso uma jirto qofkaan Alle xusin markuu

weyso qaadanayo)

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((لا وضوء لمن لم يذكر اسم الله عليه)) متفق عليه

laakiin hadii Qofku hilmaamo Bisinka markuu weyseysanayo wax dhibaato ah maleha. Intaa kadib waxaa sune ah inuu qofku gacmihiisa sadex jeer meyro intuusan weyso qaadka bilaabin, fiiri sawirkan (1)

Kadibna luqluqdo : **Luq luqashadu** waa in qofku biyo afka ku shubto ka dibna banaanka usoo tufo, Fiiri sawirkan (2)



hadana waa inuu sandaarsado: **Sandaarsigu** waa in biyo gacanta lagu qaado si sanku u jiito biyahaas, kadibna biyahaas dibada loo soo firdhiyo si wixii wasakha ee sanku ku jirtay ay dibada ugu soo baxaan.



Fiiri sawirkan (2)

waxaana fiican haduusan qofku soomaneyn in marka la sandaar-sanayo lagu xeel dheeraado sandaarsiga, laakiin hadii qofku sooman yahay waxaa laga baqayaa in biyuhu caloosha gaaraan Nabiguna wuxuu ka yiri arintan : (Si fiican u

san daarso inaad sooman tahay ma, ahane)

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((وبالغ في الاستنشاق إلا أن تكون صائما)) متفق عليه

intaas kadib wuxuu dhaqayaa wajigiisa: Wajiga dherer ahaan waa laga soo bilaabo meeshay timaha madaxa ka baxa-fooda- ka bilowdaan ilaa laga gaaro daadaga garka, balaar ahaana waa labada dhagood inta udhaxeysa.

Fiiri sawirkan (3) iyo kan kale (3)



timaha garku hadey yar yihiin waxaa waajib ah in la meyro si biyuhu ugaaraan jirka,

laakiin haday badan yahiin waxaa ku filan in korka laga dhaqo, waxaana sii fiican in garka dhexdiisa faraha la galgaliyo waayo Nabiga ﷺ ayaa sidaas yeeli jiray.




Fiiri sawirkan (4)
intaas kadib wuxuu dhaq-
ayaa gacmihiisa ilaa suxu-
lada laga gaaro.

لقوله تعالى: (وأيديكم إلى المرافق)

سورة المائدة (٦)

Fiiri sawirkan (5)



Kadibna labadiiisa gacmood ayuu
ku masaxayaa madaxiisa iyo
labadiiisa dhagood, markuu mada-
xiisa masaxayo wuxuu ka bilaab-
ayaa timaha fooda-isagoo adeegs-
anaya labadiiisa gacmood ilaa
uu ka gaaro qadaadka timaha ku
yaal. Fiiri sawirkan (6a) Fiiri
sawirkan (6b) Fiiri sawirkan (6c)
kadibna gacmihiisa qoyaankii ku



haray ayuu labadiiisa dhagood ku masaxayaa.

Fiiri sawirkan (7)

In taa ka dib ayaa waxuu meyrayaa labadiiisa lugood ilaa
anqowyada laga gaaro.

لقوله تعالى: (وأرجلكم إلى الكعبين) سورة المائدة (٦)



Anqowyada waxaa la yiraahdaa labada lafood ee ku taala dhudhunka lugta hoostiisa, waxaana waajib ah in lala meyro lugaha. Fiiri sawirkan (8)

Qofkii gacantiisu ama lugtiisu go,an tahay wuxuu meyrayaa wixii baaqi ka ah gacanta go,an ama lugta. Fiiri sawirkan (9)

Laakiin haday lugtu ama gacantu salka ka go,an yihiin waxaa la meyrayaa mid walba madaxiisa. Kadibna Markuu weysada dhameeyo wuxuu oranayaa ducadan:

أشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، وأشهد أن محمدا عبده ورسوله ، اللهم اجعلني من التوابين واجعلني من المتطهرين) رواه مسلم . أما لفظ اللهم اجعلني من التوابين الخ)

فرواه الترمذي وصححه الألباني في الأرواء (٩٦).



Oo macnaheedu yahay:(waxaan makhraati ka ahay inuusan jirin illaah, xaq lagu caabudo- oon aheyn - Allaha waax-idka ah ee uusan jirin wax la wadaaga illaahnimadiisa. Waxaan kale oon

makhraati ka ahay in Nabi Mux,ed ﷺ yahay adoon Eebe iyo rasuulkiisii) Allow iga dhig kuwa markay gafaan



adiga kuu soo laabta Allow iga dhig kuwa jecel mar kasta dhahaarada.

SUNOOYINKA WAYSO QAADKA

1-Waxaa sune ah in qofka muslimka uu cadeeydo Intuusan weyso qaadan ka hor isagoo raacaya hadalkii Nabigu ﷺ yiri: (*Hadaana ka baqeynin inaan dhibo ummaddeyda waxaan amri lahaa inay cadeeydaan mar kasta oo ay weyso qaadanayaan*)

لقوله ﷺ : (لولا أن أشق على أمتي لأمرتهم بالسواك مع كل الوضوء) رواه أحمد

وصححه الألباني في الإرواء (٧٠)

2-Waxaa sune ah in qofka muslimka intuusan weysada bilaabin ka hor uu meyro gacmahiisa sadex jeer, laakiin haduu kasoo tooso hurdo waxaa waajib ku ah intuusan weysada bilaabin ka hor inuu meyro gacmahiisa sadex jeer, maxaa yeelay waxaa dhici kara in gacantiisu taabatay wasakh uusan ogeyn, taasna waxaa daliil u ah hadalkii Nabigu ﷺ yiri: (*Hadii axadkiin uu ka tooso hurdadiisa yuusan gacantiisa galinin weelka ilaa uu ka meyro sadex jeer maxaa yeelay ma oga meesha ay gacantiisu bariday*)

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((إذا استيقظ أحدكم من نومه فلا يغمس يده في الإناء حتى

يغسلها ثلاثاً ، فإنه لا يدري أين باتت يده))

3-Waxaa sune ah in marka la sandaarsanayo si fiican loo san daarsado sidaan kor kusoo cadeynay. **4-Waxaa sune ah** in qofka muslimka ah markuu wajjiga meyrayo uu garkiisa gacmaha galiyo si biyuhu ugaaraan jirka. **5-Waxaa sune ah** in marka la meyrayo lugaha si fiican gacmaha loo dhex galiyo faraha lugaha ku dhaqan lagu dhaqmayo hadalkii Nabigu ﷺ yiri : (*faraha lugaha gacanta dhex mari*). **6-Waxaa sune ah** in qofka muslimka ah markuu weyseysanayo uu ka bilaabo xubnihiisa midigta, intuusan meyrin xubnihiisa bidixda .Tusaale ahaan waxaa la rabaa markuu gacmaha meyrayo inuu ka bilaabo midigta markuu dhaqayo lugahana inuu ka bilaabo lugta midigta ah. **7-Waxaa sune ah** in qofka muslimka ah markuu weyseysanayo uu dhaqo xubnihiisa labo jeer ama sadex jeer, mana ahan inuu sadex jeer ka badiyo, Madaxase waxaa la masaxayaa hal marra kaliya . **8-Waxaa sune ah** inuu qofka muslimka ah biyaha tashiilo markuu weyseysanayo, Nabigu ﷺ weysadiisu waxay aheyd sadex sadex jeer wuxuuna yiri:(*qofkii markuu weyseysanayo sadex sadex jeer ka badiya waxuu ku dhacay dulmi iyo waxaan habooneyn*)

WAXYAABAHA WEYSADA JABIYA
QOFKA MUSLIMKA WAXAA WEYSADA KA JABIYA
WAXYAABAHAN:

1-Wixii ka soo baxa labada duleel kaadi ama saxaro.
2- Hadii qof neef ka timaado dabada. **3-Hadii qof caqligu** ka tago sida waalida ama suuxdinta ,ama wareerka daran, ama uu seexo hurdo culus oo uusan daremeynin wixii dabadiisa ka soo baxa. Intaasoo dhan waxay buriyaan weysada, Laakiin haday hurdadu tahay mid fudud oon qofka dareenka ka qaadeynin weysadiisu ma bureyso. waxaa kale oo Weysada jabiya: **4-In qofku taabto** farjigiisa ama farji kale, taasna waxaa daliil u ah hadalkii Nabigu ﷺ yiri: *(Qofkii taabta farjigiisa ha weyso qaato)*

لقوله ﷺ: (من مس فرجه فليتوضأ) رواه ابن ماجة وصححه الألباني في الارواء (١١٧)

5-Hadii qof cuno hilibka geela weysadiisu wey buraysaa, maxaa yeelay waxaa la weydiiyey Nabiga ﷺ .
(Hilibka geela ma ka weyso qaadanaa? Wuxuuna ku jawaabay haa)

sido kale qofkii cuna caloosha geela ama beerkiisa ama baruurtiisa ama kalyihiisa ama beeryarada geela weysadiisu wey bureysaa, waayo wuxuu la mid yahay sidii qof cunay hilibka geela.Laakiin haduu qofku cabo caanaha geela weysadiisu ma bureyso, waayo waxaa sunada ku cad in Nabigu ﷺ amray saxaabada qaar ka mida inay cabaan caanaha geelii sadaqada muslimiinta ahaa, mana amrin Nabigu ﷺ inay ka weyso qaataan cabida caanahiisa.

WAXYAABAHA XAARAANTA KA AH QOFKAAN WEYSO QABIN

Hadii qofka muslimka ah uusan weyso qabin waxaa ka xaaraama waxyaabahan: **1-Inuu taabto musxaf Qur,ana** waxaana u daliila hadalkuu yiri Nabigu markuu kitaabka u udiray reer yaman : (*yuusan taabanin Musxafka Qur,aanka qofaan daahir aheyn*)

لقوله صلى الله عليه وسلم في كتابه إلى أهل اليمن ((لا يمس القرآن إلا طاهر)) رواه الدارقطني

وصححه الأرواء (١٢٢)

laakiin qofkaan weyso qabin haduu Qur,aanka akhriyo isagoon musxafka taaban wax dhibaato ah ma lehan. **2-Salaada** :Qofkaan weyso qabin uma banaana inuu tukado ilaa uu ka weyso qaato, waxaana u daliila hadalkii Nabigu ﷺ yiri : (*Alle ma aqbaloo salaad aan weyso qab lagu tukan*)

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((لا يقبل الله صلاة بغير طهور)) رواه مسلم.

Qofkaan weysada qabin waxaa u banaan inuu sujuudo sujuudu-Tilaawah Iyo sujuudul-Shukri. **Sujuud-Tilaawah** waa mida la sujuudo marka la aqriyo aayad amreysa sujuud, **Sujuudul-shukrina** waa mida la sujuudo markii farax yimaado ama dhib laga badbaado waxaana sii haboon in lagu sujuudo weyso qab.

3-AL-Dhawaaf: uma banaana qafaan weyso qabin inuu dhawaaf ka badda waxaana daliil u ah hadalkii Nabigu ﷺ yiri: (*dhawaafka kacbadu waa salaad*) mida kale Nabigu ﷺ wuxuu dhawaafay isagoo weyso qaba.

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((الطواف بالبيت صلاة))

رواه الترمذي وصححه الألباني في الأرواء (١٢١)

Fiiro gaar ah:

Qofka raba inuu weyso qaato shardi ma,ahan inuu istijoodo, maxaa yeelay waxaa la istijoodaa kadib markii la kaadiyo ama la saxaroodo, weysada iyo istijaduna iskuma xira.

MIDA LABAAD HABKA LOO TUKADO

Qofka muslimka ah markuu rabo inuu tukado waa inuu ujeedsadaa qiblada ka dibna dhaho Allaahu Akbar ((الله أكبر)). Maxaa yeelay takbiirtu waa tiir ka mida tiirarka aysan salaadu la,aantiis xirmeynin, waxaana daliil u ah hadalkii Nabigu ﷺ yiri:(Markaad rabto inaad tukato si fiican uweyso qaado, kadibna qiblada ujeedso oo takbiirso)

لقوله صلى الله عليه وسلم : ((إذا قمت إلى الصلاة فأسبغ الوضوء ثم استقبل القبلة فكبر))

متفق عليه

Takbiirta waxaa la rabaa in carabka laga dhaho, shardina ma,ahan in aad loogu dhawaaqo, laakiin haduusan qofku hadli karin qalbiga ayuu ka niyoonayaa. Waxaa sune ah in marka salaada la xiranayo labada gacmood oo mid kasta faraheedu is heystaan kor loo qaado oo garbaha lala simo.

Fiiri sawirkan (1)

Waxaana daliil u ah hadalkuu yiri ibnu Cumar A.H.R.N. (Nabigu ﷺ markuu salaada xiranayo iyo markuu rukuucayo iyo markuu rukuucda kasoo kacayo dhamaan labadiisa gacmood ayuu garbihiisa la simi jiray)

لقول ابن عمر رضي الله عنه ((أن النبي صلى الله عليه وسلم كان يرفع يديه حذو منكبيه إذا افتتح الصلاة ، وإذا كبر للركوع وإذا رفع رأسه من الركوع) متفق عليه .



ama labadiisa gacmood ayuu kor uqaadi markaasuu la simi labadiisa dhagood siduu inoo cadeeyey Maalik Ibnu-Xuweyris A.H.R.N. xadiiskuu ka wariyey Nabiga ﷺ .

لحديث مالك بن الحويرث رضي الله عنه ((أن رسول الله صلى الله عليه وسلم كان إذا كبر ورفع يديه حتى يخاذي بما أذنيه)) رواه مسلم .



2

Fiiri sawirkan (2)

ka dibna gacantiisa midig ayuu ku qaban gacantiisa bidix markaasuu xabadkiisa saari.

Fiiri sawirkan (3)

ama gacantiisa midig ayuu saari dhudh-unkiisa bidix markaasuu labada gacmood xabadkiisa saari sida ku cad axaadiistan uu Waa,il Ibnu-Xujri ka wariyey Nabiga ﷺ



3

لحديث وائل بن حجر ((فكبر- أي النبي صلى الله عليه وسلم - ثم وضع يده اليمنى على ظهر كفه الأيسر واليسغ والساعد)) رواه أبو داود وصححه الألباني في صفة النبي.



4

ولحديث وائل ((كان يضعهما على صدره)) رواه ابن خزيمة وصححه الألباني في صفة النبي صلى الله عليه وسلم .

Fiiri sawirkan (4)

intaa ka dib wuxuu fiirin barta uu ku sujuudayo, Caa,isha A.H.R.N. waxay tiri iyadoo ka hadleysa salaadii Nabiga ﷺ : (Indhaha Nabiga ﷺ ma seegi jirin meesha uu ku sujuudayo)

لقول عائشة رضي الله عنها عن صلاته ((ما حلف بصره موضع سجوده)) رواه البيهقي وصححه الألباني في صفة النبي .

Intaas kadib wuxuu aqrin ducada salaada lagu bilowdo ee suneda ah, ducooyinka salaada lagu furtana wey faro badan yihiin waxaana ka mida ducadan :

((سبحانك اللهم وبحمدك ، وتبارك اسمك ، وتعالى جدك ، ولا إله غيرك)) رواه أبو داود وصححه الألباني في صفة النبي صلى الله عليه وسلم .

ama wuxuu dhihi ducadan:

اللهم باعد بيني وبين خطاياي كما باعدت بين المشرق والمغرب ، اللهم تقني من خطاياي كما ينقى الثوب الأبيض من الدنس ، اللهم اغسلني بالماء والثلج والبرد .

ducada kadib sheydaanka ayuu iska naari wuxuuna dhihi:

((أعوذ بالله من الشيطان الرجيم))

haduu doonana wuxuu dhihi : ((أعوذ بالله السميع العليم من الشيطان الرجيم))

haduu rabana wuxuu dhihi : ((أعوذ بالله السميع العليم من الشيطان الرجيم من همزه

ونفخه ونفثه))

oo macnaheedu yahay: (*Alleha wax walba maqla, wax kastana og waxaan ka magan gali sheydaanka xun waalidiisa, iyo kibirkiisa iyo gabayga kiisa xun*)

intaa ka dib ayuu akhrin bisinka ((بسم الله الرحمن الرحيم))

Rakcad kastana wuxuu akhrin faatixadda, maxaa yeelay waa rukni aysan salaadu asaxeynin la, aanteed Nabiguna

☪ wuxuu yiri : (*salaad uma jirto qofkaan faataxadda aqrin*)

((لا صلاة لمن لم يقرأ بفاتحة الكتاب)) متفق عليه

Qofku haduusan faatixadda aqoonin wuxuu aqrinayaa Qur,aanka intiisa kale, haduusan Qur,aanka waxba ka aqoona wuxuu dhihi wardigan:

((سبحان الله والحمد لله ولا إله إلا الله والله أكبر ولا حول ولا قوة إلا بالله)) رواه

أبو داود وصححه الألباني في صفة صلاة النبي صلى الله عليه وسلم .

Waxaana waajib ku ah inuu barto faatixadda. Intaa kadib faatixadda gadaasheeda wuxuu aqrinayaa suurad ama dhowr aayadood, kadibna wuu rukuucayaa isagoo dhahaya Allaahu Akbar ((الله أكبر)) Markaasuu labadiisa gacmood kor uqaadayaa isagoo la simaya garbihiisa ama dhagahiisa sidaan horey usoo cadeynay. Waxaana waajib ah inuu dhabarkiisa simo markuu rukuucayo.



Fiiri sawirkan (5) labadiisa gacmoodna wuxuu ku qaban jilbihiisa iyadoo farahiisu furan yihiin

Fiiri sawirkan (6) kadibna wuxuu dhihi :Subxaana Rabbiyal-Cadiim (سبحان ربي العظيم)

waxaana waajib ah inuu hal mara dhaho, wixii mar ka badana waa suno. Waxaa kale oo sune ah in marka la rukuucayo la dhaho Subxaanaka Allaahuma Rabanaa Wa bixamdika Allaahuma Iqfir lii



((سبحانك اللهم ربنا وبحمدك ، اللهم اغفر لي)) متفق عليه

ama wardigan kale:

((سبوح قدوس رب : الملائكة والروح)) رواه مسلم



fiiri labadan sawir ee cadeynaya rukuucda sida khaladka loo rukuucay.

أنظر صورتين فيها ركوع خاطيء

intaas ka dib ayuu ka toosi rukuucda wuxuuna dhihi
Samica-Ilaahu liman xamidah: ((سمع الله))



((waxaana suna ah markuu
rukuucda ka tooso inuu labadiisa
gacmood kor uqaado sidaan kusoo
cadeynay sawirkii (1,2) ka dibna
dhaho mid ka mida wardigan: Rabanaa
lakal-xamdu ama Rabanaa walakal-
xamdu

((ربنا لك الحمد)) ((ربنا ولك الحمد))

((اللهم ربنا لك الحمد)) ((اللهم ربنا ولك الحمد))

ka dibna waxaa suna ah inuu wardigan kale dhaho:

((ملاء السموات والأرض وملء ما شئت من شيء بعد ، أهل الثناء والمجد أحق ما قال
العبيد ، وكلنا لك عبد، لا مانع لما أعطيت ، ولا معطي لما منعت، ولا ينفع ذا الجد منك
الجد)) رواه مسلم.



waxaa kale oo suna ah inuu gacantiisa
midigoo dul saaran gacantiisa bidix xabadka
saaro siduu yeelay istaagii rukuucda ka
horeeyey.dib u Fiiri sawir(3,4)

ama Fiiri sawirka (7A)

waxaa khalad ah in qofku gacmaha taago
sidii isagoo Alle baryaya Fiiri sawirkan

Intaas ka dib wuu sujuudi isagoo dhahaya Allaahu-Akbar((الله أكبر)) markuu sujuudayana wuxuu ku hor marin dhulka jilbihiisa sida ku cad xadiiska Waa,il Ibnu-Xujri yiri : *(waxaan arkay Nabiga ﷺ oo markuu sujuudayo jilbihiisa dhulka dhiga intuusa gacmihiisa dajin).*



لحديث وائل بن حجر رضي الله عنه قال : ((رأيت النبي صلى الله عليه وسلم إذا سجد وضع ركبتيه قبل يديه)) حديث صحيح رواه أهل السنن.



Fiiri sawirkan (7B)

waxaana waajib ku ah qofka muslimka ah markuu sujuudayo inuu ka sujuudo *todobadda xibnood: labada lugood,labada jilbood,labada gacmood iyo wajigiisa oo sanku la socdo.* Umana banaana inuu xubin ka mida xubnahan dhulka kor uga qaado markuu sujuudsan

yahay. hadii uusan awoodin inuu sujuudana xanuun owgiis inta awoodiisu usaamaxdo ayuu foorarsan. Fiiri sawirkan (8) markuu sujuudayana waxaa sune ah inuu cududadiisa ka fogeeyo dhinacyadiisa, maxaa yeelay Nabigu ﷺ markuu sujuudayo waxaa la arki jiray cadaanta kilkilahiisa. Allaahuma inuu qofku ka baqo inuu dadka dhibo ma ahane .



((كان يسجد حتى يرى بياض إبطيه)) متفق عليه

Fiiri sawirkan (7J)



Faraha lugaha marka la sujuudsan yahay waxaa loo jeedinayaa dhinaca qiblada waxaa sune ah in marka la sujuudayo la kala fogeeyo jilbaha iyo caloosha.

waxaa kale oo sune ah inaan la isku dhajin labada jilbood marka la

sujuudayo oo la kala fogeeyo, laakiin labada cidhbood waxaa sune ah in la isku dhajiyo sida ku cad ficilkii Nabiga ﷺ markuu sujuudayo. Fiiri sawirkan (7X)



Waxaana karaahiyo ah in qofku markuu sujuudayo uu dhudhumahiisa-gacmaha-fidiyo sida ku cad xadiiskan Nabigu yiri ﷺ : (yuusan ufidinin axadkiin dhudhumahiisa sida eygu u fidiyoo kale)

((لا يسط أحدكم ذراعيه انسياط الكلب)) متفق عليه



Fiiri sawirkan (9)

laakiin haduu qofku ku daalo sujuuda wey ubanaan tahay inuu dhudhumahiisa ku nasiyo laba-diisa boodyood.

Fiiri sawirakan (10)



waxaana waajiba inuu yiraahdo markuu sujuudsan yahay Subxaana Rabiyaal Aclaa .

((سبحان ربي الأعلى)) hal mara, haduu mar wax ka badana dhahana waa suno, waxaa kale oo sune ah inuu dhaho markuu sujuudo Adkaartan:

((سبحانك اللهم ربنا وبحمدك ، اللهم اغفر لي)) رواه مسلم..

سبحانك اللهم ربنا وبحمدك ، اللهم اغفر لي ((متفق عليه)).

ka dibna madaxiisa ayuu kor u qaadayaa markaasuu dhahayaa Allaahu Akbar



((الله أكبر)) ka dibna labada sujuudood inta u dhaxeysa ayuu fadhiisanayaa isagoo ku fariisanaya lugta bidix, lugta midigna taagaya.

Fiiri sawirkan (11) Sidoo kale

Fiiri labadan Sawir ee sida

khaladka ah loo fariistay (11A)

iyo (11B)

waxaana waajiba inuu yiraahdo mudada u dhaxeysa labada

sujuudood ((Rabi iqfir lii)) ((رب اغفر لي)) hal mara inla

dhaho waa waajib wixii ka

badana waa suno, waxaa

kale oo sune ah in la

dhaho inta u dhaxeysa

labada sujuudood ducan

gaaban: *Rabi iqfir lii*

Warxamnii Wahdini

Wacaafinii Warsuqnii



((رب اغفر لي وارحمني واهدني وعافني وارزقني)) (١٥٣)

رواه ابو داود وصححه الألباني في صفة صلاة النبي صلى الله عليه وسلم .

Qofku intuu fadhiyo labada sujuudood dhaxd-ooda gacmihiisa wuxuu saarayaa labadiisa boody-ood farahiisana jilbaha korkooda.

Fiiri sawirkan (12)



waxaana u banaan inuu kala saaro labadiisa gacmood labadiisa jilbood sidii isagoo jilib kasta gacan ku haya. Fiiri sawirkan (13)

intaas kadib ayuu sujuudayaa wuxu-una sameynayaa-sujuuda labaad siduu yeelay suju-udii horoo kale. Intaas kadib ayuu u istaagayaa rakcadii

labaad isagoo markuu kacayo cuskanaya labadiisa jilbood, dhahayana Allaahu-Akbar ((الله أكبر)) **Rakcada**

labaad wuxuu u tukanayaa siduu u tukaday rakcadii koobaad Waxaa

kaliya oo ay ku kala duwan yihiin **Rakcada labaad**: malaha ducada

salaada lagu bilowdo, sheydaanka la iskama naaro marka Qur'aanka la

bilaabayo, maxaa yeelay **Rakcadii koobaad** ayuu ducada salaada lagu bilowdo aqriyey sheydaankana iska naaray.

Intaas kadib dhamaadka rakcadda labaad ayuu lugtiisa bidix ku fariisanayaa.

Fiiri sawirkan (13)





14

markaasuu gacantiisa midig faryaradiisa iyo farta ku xigta soo laabayaa, fardhexada iyo suulkana wuu isku qabanayaa sidii iyadoo la moodo wareeg, markaasuu far murugsatada taagayaa markasta oo uu Alle baryayo.

Fiiri sawirkan (14)

ama dhamaan faraha midigta oo dhan ayuu soo laabayaa markaasuu far murugsatada taagayaa markasta oo uu Alle baryayo.

Fiiri sawirkan (15)

laakiin gacantiisa bidix haduu rabo farahiisoo laaban ama fidsan ayuu jilibkiisa bidix dul saari wuxuuna oronayaa



15

At-Tixiyaadkan.

التحيات لله والصلوات والطيبات ، السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته ، السلام علينا وعلى عباد الله الصالحين
أشهد أن لا إله إلا الله و أشهد أن محمدا عبده ورسوله))

hadii salaadu tahay salaadaha afarta rakcadood ah sida Duhurka Casrka,Cishaha wuxuu qofku u fariisanayaa At-Tixiyaatka dambe sidan. : Sinta ayuu dhulka dhigayaa ka dibna lugta midig ayuu taagayaa mida bidixna wuxuu ku hoos goglayaa lugta midig.



Fiiri sawirkan (16) ama (17)

Intaa kadib ayuu dhahayaa At-Tixiyaatkii koobaad wuxuuna ku siyaadinayaa saliga Nabiga ﷺ

اللهم صلى محمد وعلى آل محمد ، كما صليت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم إنك حميد مجيد، وبارك على محمد وعلى آل محمد كما باركت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم إنك حميد مجيد

waxaana sune ah in la dhaho saliga

Nabiga ﷺ gadaashiisa ducadan :

(اللهم إني أعوذ بك من عذاب جهنم ، ومن عذاب القبر ، ومن فتنة الغيا والممات ، ومن فتنة المسيح الدجال) متفق عليه

ka dibna wuxuu rabo ayuu ku duceysanayaa sida ducadan i.w.m.



((اللهم أعني على ذكرك وشكرك وحسن عبادتك))

٣٤٧ رواه ابوداود وصححه الألباني في صفة صلاة

النبي ﷺ

intaas ka dib ayuu u salaamo naqsanayaa dhinaca midigtiisa iyo bidixdiisa

((السلام عليكم ورحمة الله وبركاته))

markay salaadu dhamaato ayuu oronayaa wardigan ka soo arooray Nabiga ﷺ salaadaha kadib

((استغفر الله ، استغفر الله ، استغفر الله ، اللهم أنت السلام ومنك السلام تباركت يا ذا الجلال

والإكرام))

((لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير ، اللهم لا مانع لما أعطيت ، ولا معطي لما منعت ، ولا ينفع ذا الجد منك الجد)) متفق عليه
((لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير ، لا إله إلا الله ولا نعبد إلا إياه ، له النعمة وله الفضل وله الثناء الحسن ، لا إله إلا الله مخلصين له الدين ولو كره الكافرون))

intaas kadib ayaa wuxuu dhihi Subxaana-LLaahi Wal-Xamduli-Ilaahi Walaahu Akbar sodon iyo sadex jeer mid kasta.

((سبحان الله والحمد لله والله أكبر))

ka dibna wuxuu dhihi wardigan :

((لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير))

intaa ka dib wuxuu aqrin Aayatul-kursi, Qul huwa-Ilaahu, Qul, acuudu Birabil-Falaq, Qul acuudu Birabin-Naas

Fiiro gaar ah:

si uu u liibaano qofka muslimka ah waxaa laga rabaa inuu ilaaliyo arimahan :

1-Waa in salaada lagu tukado masjidka. 2-Waa in lala tukado jamaacada muslimiinta. 3-Waa inaan la fudud-eysan arimahan Kor Ku xusan. Rabi ha inagu toosiyo sidii . Kheyr ku jiro .

والله اعلم وصلى الله وسلم على نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين



صفة الوضوء والصلاة

راجعها فضيلة الشيخ العلامة
عبد الله بن عبد الرحمن الجبرين
حفظه الله

ترجمه باللغة الصومالية / عبد القادر شيخ محمد أخي